



Go,aanka ka soo baxay Aas aasayaalkii Dalsan

Anagoo kala ah Shiikh Mohamed Shiikh Osman iyo Haaji Abdiqani Haaji Aadan, isla markaana ah aas aas aasayaalkii shirkaddii xawilaadda ee Dalsan, waxaan maanta oo taariikhdu tahay 11.12.2007 gaadhnay go,aan aan rabno in lagu soo afjaro dhibkii ka dhacay Dalsan, go,aankaasna waxaa uu u qoran yahay sidan:

1. In shirkadda Kaamil Consulting lacagayso dhamaan waxii guryo, dhul ama qalab kale ah ee Dalsan lahayd.
2. In Kaamil Consulting soo ururisno dhamaan daymaha iyo lacagaha kale ee Dalsan ka maqan.
3. In Golaha shareecadda(Board of Sharia) ee Kaamil Consulting kala xukumo Aas aasayaalkii, Hantiilayashii iyo Saamitydii Dalsan.
4. In Kaamil Consulting hawsha Dalsan ku soo geba gebayso ugu danabayn 30.06.2008.

Hadaba waxaan si naxiis leh uga dalbaynaa in qofkasta oo haya hanti Dalsan leedahay ka ahaato dayn ama amaano loo dhiibtaye uu sida ugu dhaqsaha badan ugu wareejiyo Kaamil Consulting.


Shiikh Mohamed Shiikh Osman
Aas aase Dalsan


Haaji Abdiqani Haaji Aadan
Aas aase Dalsan